



Oneida Indian Nation waxay ku dhawaaqday Tafaasiisha Maalgelin Isbeddel oo Socda oo Dhan \$370 Milyan oo Doolar; Balaarintii Ugu Weynayd ee Taariikhda Goobaha Dalxiiska

Mashruuca Balaarinta ee Labada Sano ah Waxaa Ka Mid Ah Xarun Cusub oo Loogu Talagalay Shirweynaha, Hudheel Cusub Iyo Waxyaabo Kale

Oneida Indian Nation maanta waxay ku dhawaaqday tafaasiisha maalgalin raasumaal ah oo dhan \$370 milyan oo doolar oo loogu talagalay isbeddelka socda ee Turning Stone Resort Casino, taasoo ah maalingelintii ugu ballaarnayd ee taariikhda goobaha dalxiiska. Isbeddelka labadada sano ah waxaa ku jiri doona xarun cusub oo loogu talagalay shirweynaha, goobo bannaanka ku yaala oo loogu talagalay xafladaha, hudheel iyo waxyaabo kale. Isbeddelka socda ayaa sii ambaqaadaya ballanqaadka Oneida Indian Nation ee ku aaddan inay gobolka, shirkadihiisa iyo xubnaha kooxeed ay ku maalgeliso \$616 milyan oo doolar oo saameyn dhaqaale hal mar yeelan doonta, abuurida 3,600 oo fursado shaqo ah oo hal mar la bixin doono iyo soo xaraynta \$22.1 milyan oo doolar oo ah dakhliga canshuuraha gobolka iyo deegaanka.

Oneida Indian Nation Homelands (21-ka Luulyo, 2023) – Oneida Indian Nation ayaa maanta ku dhawaaqday tafaasiisha \$370 milyan oo doolar oo ah maalgalin raasumaal ah taasoo ah maalgelinta isbeddelka socda ee ugu ballaaran ee lagu sameynayo Turning Stone Resort Casino muddo labaatano sano ah. Ballaarinta ka sokow, dib-u-maalgelintani waxay noqon doontaa horumar dhammaystiran oo lagu sameeynayo goobta ugu horreysa ee loo dalxiis tago ee gobolka waxaana loo yeelayaa xarun shirweyne oo cusub, goobo bannaanka ku yaala oo lagu qabto xafladaha, hudheelo, iyo waxyaabo kaloo badan si loogu beddelo si dhammaystiran Turning Stone waqtiyada nagu soo fool leh. Nation waxa ay iskaashi la samaysay shirkadda dhismaha iyo naqshadaynta caanka ah ee Gensler, waxayna bilaabi doonaan mashruucan ballaaran ee labada sano ah horraanta sanadka soo socda. Dib-u-maalgelinta \$370 milyan oo doolar ka sokow, isbeddelka socda Turning Stone ayaa \$616 milyan oo doolar oo saamayn dhaqaale ah hal mar dhalin doona, aburi doona 3,600 oo fursado shaqo oo hal mar la heli doono waxayna soo saari doontaa \$22.1 milyan oo doolar oo ah dakhliga cashuuraha ee gobolka iyo deegaanka.

[\(Waxyaabaha ka soo bixi doona Maalgelinta Isbeddelka Socda ee Turning Stone \)](#)

Xarun Shirweyne oo Cusub oo Cabbirkeedu Dhan Yahay 77,000 Cag oo Labajirbbaaran

Maalgelinta isbeddeka socda ee Turning Stone ayaa ku labanlaabi doontaa goobta shirweynaha ee hadda jirta goobo xafladeed oo cusub oo ku yaala gudaha iyo bannaanka oo ay ka mid yihiin:

- Siddeed qolol oo cusub oo loogu talagalay kulamada, kuwaasi oo badankood leh barxadaha dibadda ku yaala
- Laba qol oo cusub oo loogu talagalay qoob-ka-ciyaarka, oo ay ku jiraan Grand Ballroom oo dhan 30,000 cag oo labajirbbaaran oo leh barxad ku aadan Shenendoah Golf Course iyo The Lodge's Great Lawn
- Barxad bannaanka ku taala oo leh saddex goob oo cusub oo loogu talagalay xafladaha
- Garaash cusub oo gudaha ku yaala oo leh 2,000 oo baarkin kaasoo si sahlan looga soo gali karo xarunta shirweynaha

Marka la dhammeeyo, xarumahan cusub waxay Turning Stone Upstate New York ka dhigi doonaan xarunta ugu weyn ee shirarka iyo mid ka mid ah saddexda goobood ee isku cabbirkaa iyo isku tayada ah ee ku yaala gobolka. Xarumaha iyo iskaashiyada haddeer jira ka sokow, xarunta cusub ee shirweynaha ayaa ballaarin doonta suuq-geynta iyo soo-jiidashada goobta dalxiiska iyo gobolka ay ku leeyihiin Mid-Atlantic iyo New England oo dhan waxayna dhalin doontaa warshado cusub iyadoo soo jiidanaysa ururo iyo xaflado waaweyn oo haybad leh.

Hudheel Cusub, Makhaayad Cusub iyo Cusbooneysiino Balaaran oo Lagu Sameynayo Hoyga Haddeer Jira

Si loo awoodo in loo martigeliyo korodhka ku yimaada martida xilliga shirweynaha iyo xafladaha, isbeddelka socda waxaa sidoo kale ku jiri doona dhisida dhismaha The Crescent. Hudheelka cusub ee Four-Diamond wuxuu martida ku qaabili doona qaab-dhismeed cajiib ah oo leh aragti iyo muuqaal xusuus leh:

- 258 qol, oo ay ku jiraan 23 qol oo waasac ah oo hal-qol iyo laba-qol ah oo loogu talagalay in laga helo mahadho heer sare ah
- Barxad soodhaweyn oo leh fadhi goobta dab lagu shido oo uu yaalo fadhi carbeed, kafateeriya adeeg degdeg ah leh iyo qol loogu talagalay dadka VIP-da ah
- Salt Seafood & Raw Bar, oo ah goob cusub oo lagu cunteeyo oo laga helo kooxda cuntokarinta ee ku guuleysatay abaalmarinta Turning Stone oo leh shan qol oo khaas ah oo lagu cunteeyo kuwaasoo lbarxado ku leh bannaanka

Hoyga hadda jira ee Turning Stone ayaa sidoo kale lagu sameyn doonaa isbeddel inta uu dib-u-dayactirka ku socda The Lodge si loo jooqteeyo halbeegyada abaal-marinta Forbes Four Star waxaana magaca The Hotel loo beddeli doonaa The Brook, kaasoo ah magaca marin-biyoodka quruxda badan ee gobolka oona bixinaya bilic cusub oo casri ah.

NY Rec & Social Club Ayaa Imaanaya Exit 33

Gudaha Diseembar 2023, The Lounge with Caesars Sportsbook wuxuu u wareegi doonaa goobta ugu casrisan ee cawayska ee ku taala Turning Stone's Exit 33, NY Rec & Social Club (horay loo dhihi jiray Lava Nightclub). Goobta madadaalada ee cusub waxaa laga heli doonaa mahadho aan wakhti lahayn iyadoo leh adeegyo casri ah oo ay ka mid yihiin:

- In ka badan 60 shaashad oo muuqaalo heer sare ah leh
- Fadhiyo/Kuraas qurux badan
- Qolol madadaalo oo raaxo leh
- Ikhtiyaaro madadaalo oo ay kamid yihiin ciyaaraha pool (billiards), foosball, shuffleboard iyo arcade
- Barxad bannaanka ku taala oo leh gododka dabka, fadhiyo raaxo leh iyo ciyaarta turubka ee blackjack

Xarunta Caafimaadka ee Ku Dhex Taala Goobta ee loogu talagalay Shaqaalaha iyo Martida

Mahadhada xubnaha kooxeed ee Turning Stone iyo guud ahaan ganacsiyada Nation ayaa lagu samayn doonaa isbeddelka socda iyo sidoo kale dhismaha xarun caafimaad oo ku taala gudaha goobta oo dhan 5,000 cag oo labajibbaaran. Iyadoo lala kaashanayo Rome Health oo ay adeegyo ka heli karaan dhammaan xubnaha kooxeed, qoysaskooda iyo martida joogto goobta dalxiiska, xarunta caafimaadka waxay bixin doontaa daryeel degdeg ah, daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah, daryeelka habboon iyo daryeelka wadnaha ee la bixinayo saacado la kordhiyay oo ay ku jiraan xilliyada fiidkii, sabtida iyo maalamaha fasaxyada.

Waxyaabaha kale ee Lagu Kordhin Doono Turning Stone

- Aag uu naqshadeeyay Robert Trent Jones Jr.-loogu talagalay tababarka ciyaarta goolofka oo leh goobo lagu barto adeegsiga usha goolofka iyo garoonka yar ee ciyaarta goolofka si loo taageero horyaalada ciyaaraha goolofka ee goobta dalxiiska
- In ka badan 120 meelood oo laga dabaysto baabuurta korontada ku shaqaysa, oo ay ku jiraan 36 Tesla Superchargers (goobaha ay baabuurta ka qaataan dabka), oo lagu rakibay dhulka Nation oo dhan iyadoo lala kaashanayo Tesla kuwaasoo loogu talagalay martida iyo shaqaalaha

Oneida Nation Enterprises ayaa Noqon Doonta Turning Stone Enterprises

Iyadoo la aqoonsanayo isebelka socda ee joogtada ah ee lagu yaqaanay ganacsiyada Oneida Indian Nation muddadii soddonka sano ahayd, Oneida Nation Enterprises, oo ah ururka aasaasiga ah ee hawlaha ganacsi ee Nation ayaa sidoo kale lagu sameyn doonaa isbeddelka socda. Markay tahay 1-da Oktoobar, Oneida Nation Enterprises ayaa noqon doonta Turning Stone Enterprises. Magaca cusub ee ururku waxa uu aqoonsanayaa doorka muhiimka ah ee Turning Stone ay ka ciyaarayso dejinta halbegyada ganacsiyada Oneida Indian Nation oo dhan

iyo waxyaabaha muhiimka ah ay soo kordhisay xubin kasta oo kooxda ka tirsan, iyadoo aan la eegayn halka ay ka shaqeeyaan, marka la joogteynayo halbeegyadan.

Saamaynta Dhaqaale ay Ku Leedahay Turning Stone iyo Oneida Indian Nation

Tan iyo markii la sameeyay 30 sano kahor, Turning Stone waxay horumar dhaqaale iyo shaqo-abuur ka sameysay Upstate New York. Falanqaynta saamaynta dhaqaale oo ay samaysay Oxford Economics, oo ah mid ka mid ah shirkadaha ugu horreeya ee caalamiga ah ee la-talinta madaxa-bannaan, ayaa sheegaty in 2022-kii oo keliya, ay Turning Stone iyo ganacsiyada kale ee Oneida Indian Nation gudaha gobolka ka soo saareen in ka badan \$ 1 bilyan oo doolar oo saameyn dhaqaale ah iyo inay sannad kasta taageeraan in ka badan 7,000 oo shaqo, oo ay ku jiraan 4,500 shaqaale ee Nation. Maalgelinta \$370 milyan oo doolar ah ee loogu talagalay isbeddelka socda Turning Stone ayaa sidoo kale dhalin doonta kumanaan shaqooyinka dhismaha ah iyo malaayiin doolar oo dakhli ah taasoo ay ugu wacan tahay korodhka martida iyo dalxiiska gobolka ee iman doono.

2023-da ayaa sidoo kale ku astaysan sannad-guuradii 10-aad ee heshiiska Settlement Agreement ee dhex maray Oneida Indian Nation, New York State iyo Oneida and Madison Counties. Tan iyo markii la ansixiyay, heshiiskani wuxuu boqolaal milyan oo doolar u soo xareeyay bulshooyinka deegaanka wuxuuna gacan ka geystay abuurista iskaashiyada xooggan oo dhex mara Nation iyo maamulada goboleed iyo ganacsatada. Iskaashiyadani waxay qayb ka ahaayeen guusha wadajirka ah ee Oneida Indian Nation iyo gobolka oo wayna sii jiri doonaan 30-ka sano ee soo socda iyo wixii ka dambeeya.

“Isbeddelka Socda ee Turning Stone waa mid aan ahayn kaliya ballaarin,” waxaa yiri Ray Halbritter, oo ah wakiilka Oneida Indian Nation Representative iyo madaxa shirkadaha Oneida Nation Enterprises CEO. “Waa isbeddel socda oo buuxa oo lagu sameynayo goobta koowaad ee dalxiiska gobolka iyo doorka ay ka ciyaarto hormuud dhaqaale ahaan. Xarumahayaga iyo iskaashiyada haddeer jira ka sokow, xarunta cusub ee shirweynaha ayaa Turning Stone iyo Central New York ka dhigi doonta meel aad loo jecel yahay in lagu qabto munaasabado waaweyn oo haybad leh.”

Ku saabsan Turning Stone Resort Casino

Gobta dalxiiska ee caanka ah, abaalmarinta ku guuleysatay ee ku taala Upstate New York, the Oneida Indian Nation’s [Turning Stone Resort Casino](#) ayaa waxay leedahay adeegyo heer caalami ah oo ay ku jiraan shan hudheelo, laba ah gabooaha daliiga oo raaxo leh, shan ah garoomada golf-ka, in ka badan 20 xulasho oo cunno ah, Goob ciyaar oo ah 125,000 cag oo labajibbaaran Las Vegas-style gaming floor, The Lounge oo ay ku taalo Caesars Sports, qolka sharadka ciyaaraha oo casri ah, The Showroom, oo ah goob maadays leh 5,000 kursi, iyo goobo badan oo loogu talagalay cawayska habeenkii. Waxay ku taalaa meel 30 mayl bariga kaga beegan Syracuse oo ku taala NYS Thruway exit 33, Turning Stone waxaa the #1 Best Gaming Resort in New York u magacaabay Casino Player Magazine (majaladda) iyo #1 Best Overall Dining. Turning Stone ayaa sidoo kale ku kasbatay abaalmarinta qaaliga ah ee Forbes Four-Star Award The Lodge, makhaayada Wildflowers restaurant, TS Steakhouse, iyo Skl:nl: Spa, iyo, muddo ka badan toban sano, abaalmarinta AAA Four Diamond Award waxaa loo magacaabay The Lodge, The Tower Hotel, iyo makhaayada Wildflowers restaurant.

